KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad | Muqdisho, 20 Majio 1974 | L. 2, R. 5

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 15 Tr. 15 Abrile 1974 — *Beddelaad Sharciga Lamb. 6 Taariikh 1 Jenayo 1974.*

---

## BOGGA LABAAD

### X E E R

W. M.

---

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGARSIIN IYO WIXII LA MID AH

W. M.

# BOGGA KOWAAD

## S H A R C I

**SHARCI L. 15, Tr. 15 Abrile 1974.**
**Beddelaad Sharciga lamb. 6 taariikh 1 Jannayo 1974.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghayayaasha Dowladda

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Qodobka 1aad iyo ka 2aad ee Sharciga tirsigiisu yahay 6 taariikhdiisuna tahay 1 Jannayo 1974 oo ku saabsan «Dembiyada maraakiibta shisheeyuhu galaan», waa la beddelay, waxaana loo aqoonsandoonaa loonaa akhrin doonaa sida soo socota:

Qodobka 1aad

Haddii markab shisheeye ahi soo galo dekedaha Soomaaliya iyadoo aanu wadan xaashiyaha sharciga ah ee loo baahan yahay, ama uu si sharci darro ah ugu xad gudbo badda Soomaaliyeed (Somali Territorial Waters), ama ku dhaqaaqo ama wax ka keenay asagoo qeyb ka gaatay waxyaabo dhaawici karkara danaha Siyaasadda, Dhaqaalaha ama danaha Guud ee Dowladda Soomaaliyeed si toosan ama si aan toosneyn (directly or indirectly) waxaa markaabkaas galay dembi.

Qodobka 2aad

1. Markab kasta oo shisheeye ah oo uu ku caddato inuu galay dembiyada uu dhigaayo sharcigan kuna saabsan:

i — soo geliddа dekedaha soomaaliyeed isagoo aanu wadan xaashiyaha sharciga ah ee loo baahan yahay; iyo

ii — ku xad gudub badda Soomaaliyeed (Somali Territorial Waters) wuxuu muteysanayaa ciqaab ganaaax ah oo gaadhaysa Shs. 10.000 (tobonkunshilinsoomaali) ilaa Shs. 100.000 (boqolkunshilinsoomaali). Bixin la'aanta ganaaxaa muddo soddon beri

2. Markab kasta oo shisheeye ah oo ay ku caddato inuu galay dembiyada sharcigan uu dhigaayo oo ku saabsan «waxyaabo dhaawici kara danaha Siyaasadda, dhaqaalaha iyo danaha Guud ee Dowladda ku dhaqaaqo ama wax ka keena asago kaga qeyb qaatay» hadba inta uu la egyahay dhaawacaa, waxaa markabkaas ciqaabtiisu noqoneysaa:

i — Ganaax gaaraya ilaa seddex jibaar qiimaha dhibaatada «demege» markabka keenay ama wax ka keenay si toos ahaan ama toosneyn (directly or indirectly).

ii — Qabasho markabka (temporary sequestration) ilaa laga bixinaayo ganaaxa seddex jibaarka ahi;

iii — qaadasho markabka (confiscation).

Qod. 2

Sharci kasta ee qodobadda sharcigan aan la socon karin ama ka soo horjeeda waa la buriyay.

Qod. 3

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta saxiixo, Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Qod. 4

Sharcigan waxaa lagu qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdishu, li 15 Abrile 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA